# *Ehrlichiosis*

## Waa maxay *ehrlichiosis*?

Cudurka e*hrlichiosis* waa mid ka mid ah cudurada badan ee shilinta laga qaado ee Maraykanka. Ugu yaraan saddex nooc oo bakteeriya oo kala duwan ayaa ku sababi kara *ehrlichiosis* dadka ku nool Mareykanka: *Ehrlichia chaffeensis*, *Ehrlichia ewingii*, iyo *Ehrlichia muris* subspecies *eauclairensis*. Xanuunada bini-aadanka ee ay keenaan *E. chaffeensis* iyo *E. ewingii* ayaa sida caadiga ah laga soo sheegaa koonfur-bari iyo koonfurta-bartamaha Maraykanka, halkaas oo shilinta lone star laga helo.

Gobolka Minnesota, tiro yar oo ka mid ah xaaladaha jirrada bini-aadanka oo ay keento *E. muris eauclairensis* ayaa sanad walba la soo sheegaa. Noocyadan ayaa markii ugu horraysay la aqoonsaday 2009-kii waxaana ilaa iyo hadda bukaanada la arkay ay sheegeen inay u dhawdahay inay soo gaadhay shilinta lugaha madow ee Minnesota ama Wisconsin. Intaa waxaa dheer, tiro yar oo ah jirrooyinka bini'aadanka oo ay keento *E. chaffeensis* ayaa sanad walba laga soo sheegaa Minnesota, qaar ka mid ahna kuwan waxay u safreen gobolada koonfurta halkaasoo cudurku uu yahay mid aad u badan.

## Sidee dadku u qaadi karaan *ehrlichiosis*?

Dadku waxay u qaadi karaan *E. muris eauclairensis* sida badan qaniinyada shilinta lugaha madow (deer tick) taasi oo sidda bakteeriyada *E. muris eauclairensis* Dhammaan shilinta lugaha madow ma sidaan bakteeriyadan, dhammaan dadka ay qaniinto shilinta lugaha madowna ma bukoodaan. Shilintu waxay u baahan tahay inay qofka ku dhagganaato muddo kahor inta ayna cudurka faafisa. Wakhtigan lama garanayo marka la eego *E. muris eauclairensis* laakiin waxay noqon kartaa qiyaastii 12-24 saacadood haddii ay u dhaqmayso si la mid ah anaplasmosis, oo ah jirro bakteeriya keento oo aad ugu dhaw.

Shilinta lugaha madow waxay ku nooshahay dhulka meelaha dhirta leh ama meelaha kaynta badan leh. Shilintu waxay ka raadsataa wax ay ku dul noolaato heerka ama heer u dhaw waxayna qabsataa marka qof ama xayawaan meesha soo maraan. Shilintu ma booddo, duusho ama kama soo dhacdo geedaha.

Gobolka Minnesota, bilaha Abriil ilaa Luulyo iyo Sebtembar ilaa Oktoobar ayaa ah kuwa khatarta ugu wayn ee in shilintu qofka qaniinto. Khatarta waxay ugu badan tahay bilaha Juunyo ama Luulyo sanad kasta. Shilinta lugaha madow waa wax yaryar; kuwa qaangaarka ah waxay la xajmi yihiin abuurka sisinta kuwa carruurta ahna waxay la xajmi yihiin siidhka bobiga. Iyadoo ay ugu wacan tahay xajmigooda yar, qofku ma ogaan karo in shilin qaniinsan tahay.

## Waa maxay astaamaha *ehrlichiosis*?

In kasta oo dadka da' kasta ay qaadi karaan *ehrlichiosis*, astaamuhu waxay u muuq karaan inay ugu daran yihiin dadka waayeelka ah iyo kuwa difaaca jirkoodu yar yahay. Calaamadaha iyo astaamaha waxaa ka mid noqon kara:

- **Qandho**
- **Madax-xanuun**
- **Murqo xanuun**
- **Tirada yar ee baleetlatiska ku jirto dhiigga**

Xanuun khatar ah iyo dhibaatooyin ayaa dhici kara haddii caabuqa aan si sax ah loo daawayn.

## Sidee loo ogaan karaa *ehrlichiosis*?

Haddii qofku tuhmo inuu qabo cudurka *ehrlichiosis*, waa inuu la xiriiraa dhakhtarka sida ugu dhakhsaha badan ee suurogal ah si looga baaro loogana daaweeyo. Baarista *ehrlichiosis* waxay kusalaysan tahay taariikhda gaadhista deegaan shilintu joogto, baaris jireed, iyo

